# Xogta Kooban ee Fulinta

Ismaamulka San Diego wuxuu u taagan yahay abuurista aduunyo sinaan iyo cadaalad badan. Waxay aqoonsan tahay cadaalad darooyinkii hore iyo caqabadaha hadda jira ee nidaamka ee ku gudban in si siman oo firfircoon lgaa shaqeeyo dawaynta waxyeellada ku dhacday bulshooyinkeena. Warbixinta Cabirada Sinaanta ayaa ah mid kamid talaabooyinka badan ee Ismaamulku qaadaayo si xal loogu helo sinaan la'aanta. Waxay aqoonsata saamaynada isir nacaybka iyo noocyada kale ee guumeysiga. Waxay naga taageeraysaa dhammaanteen inaan abuurno xeelado naga caawinaaya baabi'inta sinaan la'aanta. Xeerarka iyo farsamooyinka takoorka ku dhisan ee qarniyada socday ayaa aasaas u noqday wadankaan. Waxay abuureen ayna dhiiri geliyeen sinaan la'aan ka jirta qaybo badan oo nolosha kamid ah, ayna ku jiraan caafimaadka, badqabka, waxbarashada, dhaqaalaha, iyo isku socodka bulshada. Dadka ku nool Mareykanka ayaa si cadaalad daro ah u waajahay caafimaad yari, badqab yari, waxbarasho daro, hela mushaar daciif ah oo aan gaarin guulo badan sabab la xiriirta sirkooda iyo qoomiyadooda, jinsiga, xaalada soo galootiga, naafada, dabaqada iyo deegaanka.

Ismaamulka San Diego wuxuu muhiimada saaraa kala shaqeynta qof kasta in la isla abuuro xalal kor u qaadaaya tayooyinka nolosha ee dhammaan dadka iyo in lagala shaqeeyo dhammaan dawlada, ururada khayriga ah, ganacsiyada, dadka iyo kooxaha bulshada. Burburinta nidaamyada cadaalad darada ah maaha keliya wax dareen ahaan sax ah in la sameeyo. Sidoo kale waxay furaysaa fursadaha dhaqaalaha ee dadka nidaamku cadibay, waxay dhiiri gelinaysaa kamid ahaanshaha bulshooyinka iyo in la xoojiyo xaafadaha. Taas ayaa faa'iido noo leh dhammaanteen.

Warbixintaan ayaa muujinaysa xogta wakhti gaar ah, caadiyana sanadkii 2021, laakiin sinaan la'aanta ayaa abuurtay dhacdooyinka mudada dheer oo la filaayo inay isbadelaan si tartiib ah marka fikradaha, xeerarka, iyo nidaamyadu isbadelaan. Hoos waxaad ka helaysaa tilmaamaha muhiimka ah ee Ismaamulka San Diego ee aag kasta:

1. La xiriira **bulshooyinka iyo nolosha madaniga ah** ee sanadka 2021, waxaa yaraa isku dhafnaanta isirka/qoomiyada ee qaybaha xeebaha iyo bariga gobalka marka loo eego deegaannada bartamaha ee gobalka. Cod bixiyaasha u qalma ayay u badnayd inay iska diiwaan geliyaan deegaannada bariga iyo waqooyiga ee gobalka marka loo eego deegaannada bartamaha ee gobalka sidoo kale. Ganacsiyada ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay iyo ganacsiyada ay leeyihiin dumarka ayaa ku yaaa ismaamuka sanadka 2017 (xogtii ugu danbaysay ee la baxshay markii la abuuraayay warbixinta).

2. **Hormarinta carruurnimada hore**, ardayda dugsiyada dawlada ee qoomiyadaha Hisbaaniga iyo Madoowga ayay ku badnaayeen dhalinta bilaa hooyga ah sanad dugsiyeedkii 2021-2022, fakhriga dhalinta ayaana si aan sinayn uga dhex jirtay dhinacyada isirka, naafada, iyo dadka soo galootiga ah sanadkii 2021. Inta ugu badan, carruurta Dhaladka Hawaii ama Dadka

Jasiirada baasifiga, Hisbaaniga ama Laatiinka, Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka ayaa waajahay fakhri heer ka badan labo jibaar heerka carruurta Cadaanka ah ee Ismaamulka San Diego. Sanadkii 2019 (warbixintii ugu danbaysay ee la heli karay markii warbixinta la samaynaayay), 63% dadka waawayn ayaa waajahay midkood Khibradaha Xun ee Carruurnimada (ACEs) ama ka badan kahor inta aysan gaarin 18 sano jir. ACEs ayaa ugu badnaa ragga, aan ahayn Hisbaaniga Isirada kale, Cadaanka aan ahayn Hisbaaniga, iyo Hisbaaniga marka loo eego wadarta guud ee ismaamulka.

Dhanka **waxbarashada**, sinaan la'aan balaaran ayaa ka jirtay ardayda dhexdooda marka loo eego isirka, jinsiga, xaalada naafada, iyo xaaladaha dhaqaalaha marka lagu jiro imtaxaanka guud sanad dugsiyeedka 2021-2022, laakiin ardayda ismaamulka ayaa si guud uga dedaal badnaa ardayda facood ah ee California. Waxaa jiray heerarka qalin jebinta oo aan loo sinayn sanad dugsiyeedkii 2021-2022 iyo farqiyo u dhexeeyay ardayda 3 iyo 4 sano jirada ah ee ka diiwaan gashan dugsiga sanadkii 2021 marka loo eego isirka, naafada, iyo xaalada soo galootinimada. Sanad dugsiyeedka 2021-2022, ardayda Hisbaaniga ama Laatiinka, Afirkaanka Maraykanka, iyo Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alasaka ayaa aad ugu badnaa ardayda dugsiga laga cayriyay marka loo eego wadarkooda guud ee dugsiga ka diiwaan gashan. Dhammaan ardayda dugsiyada dawlada ee K-12, ku dhawaad 17% ardayda luuqada Ingiriiska Barta ayaa leh aqoonta Heerka 4, heerka ugu sareeya, luuqada Ingiriiska, taasoo ka dhigan inay hormar ka sameeyeen xirfadaha dhageysiga, akhriska, ku hadalka, iyo qoraalka.

3. **Sinaan la'aanta nidaamyada cuntada** ayaa sidoo kale lagu arkay isirka, jinsiga, naafada, xaalada soo galootiga, iyo deegaanka kaladuwan. Farqiyada isirka ee dhanka amaanka cuntada ee sanadka 2021 ayaa badnaa. Dadka Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka ayaa sadex jibaar u badnaa inay iska diiwaan gashaan SNAP marka loo eego dadka Cadaanka ah iyo labo jibaar i ka badan bulshada guud ee ismaamulka. Sanadkii 2019, xogtii ugu danbaysay ee la heli karay wakhtiga warbixinta la sameeyay, qaybo badan oo kamid ah ismaamulka ayaan awood fiican u lahayn iibsiga adeegyada cuntada.

4. Farqiyada ka jira natiijooyinka **caafimaadka** ee u dhexeeya kooxaha ayaa la ogaaday laga bilaabo dhalashada—miisaanka dhalashada oo hooseeya ayaa labo jibaar ku badnaa ilmaha dhasha ee hooyooyinka Madoowga ah ama Afrikaanka Mareykanka ah marka loo eego ilmaha ay dhalaan hooyooyinka cadaanka ah sanadkii 2021. Heerka nolosha xiliga dhalashada ayaa kaladuwanayd jinsi ahaan iyo isir ahaan, uuna u dhexeeyo farqi dha 9.8 sano ah mudada nolosha ugu hoosaysa iyo tan ugu saraysa marka lagu saleeyo isirka. In ka badan rubuc kamid ah bulshada ee 2021 ayaa waajahay ciriiri dhanka daryeelka caafimaadka dhimirka, caafimaadka ilkaha, ama daryeelka guud ah. Marka loo eego dadka Cadaanka ah, Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alasaka ayaa shan jeer ugu badan inaysan haysan caymis, Hisbaanig ama Laatiinka ayay u badan tahay sadex jibaad, halka Madoowga iyo Afirkaanka Maraykanka ay u badan tahay labo jibaar.

Dhanka **guryaha**, Qoysaska Cadaanka iyo Eeshiyaanka ayaa labo jibaar ugu badan inay lahaadaan mulkiyada guryo marka loo eego qoysaska Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka sanadkii 2021. Waxaa intaas dheer, qoysaska Madoowga iyo Afrikaanka Mareykanka ayay u badan tahay inay ku bixiyaan in ka badan nus kamid ah dakhigooda kirada guriga marka loo eego qoysaska kale. Sanadkii 2022, tirada dadka hooy la'aantu ku dhacday ayaa ugu badnaa magaallada San Diego, waxaa ku soo xigay Oceanside, Chula Vista, iyo El Cajon.

5. **Sinaan la'aanta ka jirta kaabeyaasha** ayaa sidoo kale jiray 2021. Tiro badan boqolkiiba dadka Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka, Dhaladka Hawaii ama Dadka Jasiirada baasifiga, Hisbaanig ama Laatiinka, Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alasaka, iyo Qaar Kamid ah Isirada kale ayaa soo sheegay inaysan haysan interneed khad fiican oo guriga ugu xiran marka loo eego dadka cadaanka ah. Shaqaale naafo ah ayaa labo jeer u badan inuu raaco gaadiidka dadwaynaha marka loo eego shaqaale aan naafo ahayn. Deegaannada bariga ee ismaamulka ayaa leh wakhtiyada ugu dheer ee safarka, gaar ahaana marka loo eego deegaannada xeebta.

6. Qaar kamid ah sinaan la'aanta ugu adag waxay ahaayeen helitaanka fursadaha **shaqada iyo dhaqaalaha**. Sanadkii 2021, ku dhawaad 27% dadka naafada ah ayaa ka qaybgalay shaqaalaha, marka loo eego 72% oo ahaa dadka aan naafada ahayn. Dadka Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka iyo dadka naafada ah ayaa leh heerarka ugu hooseeya ee shaqada ee dadka shaqeeya. Waxaa jiray sinaan la'aan dhanka saboolnimada ah oo ku saleysan isir, jinsi, naafo, iyo xaalada soo galootinimada. Dadka Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka, Hisbaanig ama Laatiinka, Dhaladka Hawaii ama Dadka Jasiirada baasifiga iyo Qaar Kamid ah Isirada kale, dadka deegaanka ee naafada ah, iyo soo galootiga ayay u badnayd inay ka hooseeyaan 200% heerka saboolnimada ee federaalka marka loo eego dadka guud ee ismaamulka. Waxaa intaas dheer, ku dhawaad 36% dadka deeganka ayaan helin mushaar ku filan sanadkii 2021. Sanadkii 2022, ku dhawaad 20% qoysaska ayaa lagu lahaa dayn raagtay, iyo dhammaan noocyada daynta, bulshooyinka aan cadaanka ahayn ayay u badnayd in laga qaado dayn si qasab ah marka loo eego inta badan bulshooyinka Cadaanka ah.

7. Waxaa sidoo kale jiray sinaan la'aan ka jirtay helitaanka **beeraha raaxada** iyo tayada **khayraadka dabiiciga ah** dhammaan degmada 2021. marka loo eego sideeda xarumood ee la socoshada tayada hawada ee degmada, Alpine ayaa lahayd heerka ugu hooseeya ee hawada tayada "Wanaagsan" ee la xiriira Ozone, halka El Cajon iyo Otay Mesa ay lahaayeen heerarka ugu hooseeya ee maalmaha hawada tayada "Wanaagsan" ee la xiriira walxaha <2.5 microns. Ku dhawaad 53% kamid ah dadka Ismaamulka San Diego ayaa si quman u tagi kara beeraha raaxada iyo xarumaha bulshada, iyo xeebaha Ismaamulka Koonfureed oo saamaynta xun kasoo gaartay xirista xeebaha.

Marka la eegaayo **nidaamka danbiga iyo sharciga** sanadkii 2021, heerarka danbiyada hubaysan ayaa ugu badnaa National City iyo Lemon Grove heerarka danbiyada guryaha ayaana ugu badnaa Del Mar iyo National City. Waxaa ka dhacay 89 danbiyada nacaybka ah ismaamulka sanadkii 2021. Todobaatan boqolkiiba (71%) danbiyada waxaa dhiiri geliyay isirka halka ku dhawaad 50% danbiyada nacaybka ee isirka ku saleysan ayaa ka soo horjeeday dadka Madoowga ah ama Afirkaanka Maraykanka ah. Magaalooyinka San Diego iyo Carlsbad, dadka Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka iyo Hisbaanig ama Laatiinka ayaa aad ugu badnaa dadka taraafigu qabteen, halka ay dhanka kale u badnaayeen Waaxda Nabadgalyada ee Ismaamulka San Diego. Waaxda Nabadgalyada ee Ismaamulka San Diego ayaa lahayd heerka ugu sareeya ee carruurta loo xiray danbiyada ayadoo ay ku xigeen waaxaha booliiska ee El Cajon, National City, iyo Escondido. Cadadka dadka xabsiyada la dhigay ee dadka Madoowga ama Afrikaanka Mareykanka ah ayaa ka badnayn kuwa dadka cadaanka ah, heerarka dadka Hisbaaniga ama Laatiinka ah iyo Dhaladka Hawaii ama Dadka Jasiirada baasifiga ayaa labo jibaar ka badnaa heerka dadka Cadaanka ah.

Warbixintaan ayaa la filayaa inay dhiiri geliyo xogta kale ee dawlada ayna abuurto talaabo gobaku qaado, taasoo ka dhigaysa meel ku haboon noosha, shaqada iyo guusha qof kasta. Xogta ku qoran warbixintaan ayaa loo adeegsan doonaa dhisida tirakoobka dawladaha gobalka iyo wakaaladaha ee ku aadan muhiimada sinaanta iyo abuurista wada shaqayn ku aadan kor uq aadista natiijooyinka.